OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

# FARSHAXANKA Saldhigga King Street: Baaq Loogu Talagalay Bandhigyo Sanadka 2027

CODSIGU WUXUU FURMAYAA: Agoosto 18, 2026
**CODSIGU WUXUU XIRMAYAA: Sabteembar 29, 2026 5 PM Pacific**

## Dulmarka Deeqaha

XAFIISKA FARSHAXANKA IYO DHAQANKA (OAC) ee Seattle waxay ku casumaysaafarshaxaniinta kalida ah, hal-abuuryada, hay'adaha, iyo kooxaha ka yimid ah hay'adaha bulshadain lagu soo bandhigyo fanka iyo dhaqanka ee xarunteenna dhaqameed iyo barxadda,FARSHAXANKA Saldhiga King Streetoo dhacaya inta lagu jiro 2027. Codsigani wuxuu ku saabsan yahay oo keliya bandhigyada iyo barnaamijyada la xiriira. Ma aqbalayno shaqooyin u taagan oo ku salaysan bandhig-faneed keliya inta lagu jiro codsigan.

Macluumaad iyo caawimaad ku saabsan codsiga, u-qalmaanshaha, ama taageerada farsamada ee khadka, la xiriir James Coley, Hogaanka Barmaanijka Saldhiga King Street, adoo ka wacaya 206-684-4186 amajames.coley@seattle.gov.

**Waxaan noo jooga turjubaano kugula hadli kara luuqadaada, kuwaasoo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan).** Naga soo wac un 206-684-7171 (cod) ama 800-833-6388 (DDD Relay) oo noo sheeg luuqadaad ku hadasho.  Fadlan sug qaddar kooban inta aanu raadineyno turjubaan ku soo biira wicitaanka.

## Codsiga

Ka codso khadka adoo isticmaalaya Submittable.

## Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

**Talaado, Sabteembar 29, 2026, 5 PM Pacific**

## U-qalmitaanka

Waxaad u-qalantaa inaad codsato maalgelin haddii **aad buuxiso shuruudaha soo socda:**

- Waxaad tahay farshaxan-sameeye, maxfadhaye, urur, ama koox bulshada ku salaysan oo ku sugan magaalada isla markaana xiriir xooggan la leh, kana qaybqaata si joogto ahwaxaad soo bandhigtaa shaqo gudaha.

- Waxaad ka tirsan tahay urur ama waxaad tahay farshaxan-sameeye u matala bulshooyinka sida ugu badan u saameeyo dulmiga nidaamsan. Dadka dakhligoodu hooseeyo, dadka naafada ah, bulshooyinka soo-galootiga iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midabka leh waa lagu dhiirri-gelinayaa inay codsadaan.

Adigu*ma tihid* mid u qalma deeqdan hadii:

- Mashruucaagu wuxuu si toos ah u iibinayaa agab, wuxuu soo dhajin qiimayaal, ama wuxuu leeyahay tigidh-iib. Dhamaan mashruucyadu waa inay dadweynaha loo soo bandhigaa si lacag la'aan.

## Siyaasada Shaacinta AI

Aalada macmalka ah (AI) lama xaddido marka farshaxanka la abuuro iyadoo uu jiro wax-ku-ool badan oo ay hoggaamiyaan farshaxaniistaha/ farshaxaniistayaasha. Farshaxaniistuhu waa inuu ahaadaa qoraaga ugu weyn, isaga oo hagaya fikradda farshaxanka iyo fulinta. Waa inaad hubisaa xuquuqda qoraalka iyo lahaanshaha, sidoo kale tixgelisaa khataraha la xiriira asturnaanta iyo hantida aqooneed, luminta codka iyo aragtida dhabta ah, khaladaadka, eexda, iyo xasaasiyad la’aanta dhaqameed.

**Waa inaad shaacisaa haddii AI loo adeegsaday abuurista mashruucaaga la soo jeediyay** isla markaana aad bixisaa sharaxaad qeexaysa sida AI loo adeegsaday. Waxaan xaq u leennahay inaan codsanno faahfaahin ama dukumeenti ku saabsan sida AI loogu isticmaalay mashruucaaga. Maadaama horumarka AI uu si degdeg ah u socdo, siyaasaddan si joogto ah ayaa dib loo eegi doonaa, waxaana laga yaabaa in la beddelo.

## Maalgelinta

Lacagaha deeqda **ilaa $20,000** ayaa diyaar u ah mushaarka shaqaalaha hal-abuurka leh iyo kharashyada mashruuca.

## Kulamada Macluumaadka

Ku biir kulan macluumaad oo khadka ah si'aad fursaddan wax badan uga ogaato.

### Kulanka 1

Arbaca, Agoosto 26, 2026, 4-5 PM
Isdiiwaangelin ka hor Agoosto 26-da

### Kulanka 2

Talaado, Sabteembar 1, 2026, 3-4 PM
Isdiiwaan gelin ka hor Sabteembar 1

## Kulanka 3

Talaado, Sabteembar 15, 2026, 12-1 PM
Isdiiwaan gelin ka hor Sabteembar 15

## Kulanka 4

Talaado, Sabteembar 22, 2026, 12-1PM
Isdiiwaan gelin ka hor Sabteembar 22